

Linda Davidsson, 0322-600806

[Linda.davidsson@vargarda.se](mailto:Linda.davidsson@vargarda.se)

## Akhbaar ku saabsan barashada afka hooyo

Ujeedada laga leeyahay in ardayda la baro afkooda waxay tahay in fursad loo siiyo inay aqoontooda ku kobciyaan afkoodii hooyo. Afka hooyo macno wayn ayuu u leeyahay caruurta luuqadooda, aqoonsigooda-, shakhsiyaddooda- iyo kobcinta garaadkooda. Ilmuhu hadduu si fiican u yaqaano afkiisa hooyo waxay u sahlayso barashada iswiidhishka, luuqadaha kale iyo maadooyinka kale ee iskulka lagu dhigo.

Habka qiimaynta aqoonta iyo bixinta dhibcaha waxay lamid tahay maadooyinka kale. Aqoonta ay ardaydu barten iyo heerka ay ka gaadheen waxaa lagu qiimayn shuruudaha ku qoran manhajka loo dajiyay maadadaas.

Maadadan barashada afka hooyo ee lagu barto dugsiga hoose/dhexe waxaa soo codsada waalidka oo qaabilsan, halka ay ardayda laftoodu ka codsanayaan marka ay gaadhaan dugsiga sare. Had iyo jeer codsiga waxaa lagu hagaajiyaa maamulaha dugsiga.

Foomka aad ku codsanayso waxaad ka heli kartaa bogga ay dagmadu ku leedahay intarnetka.

Iyadoo la tixraaciyo sharciga waxbarashada ee 10 kap. 7 § waxaa arday kasta oo dhigta dugsiyada aasaasiga ah, dugsiyada aasaasiga ee naafada, dugsiyada khaaska ah iyo dugsiyada qoomiyadda seemigaba loo soo bandhigaa barashada afka hooyo hadii:

- Labada waalid ama midkood afkiisa hooyo uusan ahayn Iswiidhish
- Luuqadu saamaynayso noolal maalmeed ardayga inta uu guriga joogo iyo
- Uu ardaygu aqoon aasaasi ah u leeyahay luqadaas.

Mas' uuliyada isku dubridka barashada afka hooyo waxay saarantahay maamulaha oo kaliya hadii:

- La helayo ugu yaraan shan arady oo xaq u leh barashada afka hooyo
- Ay ardaydaasi doonayaan inay luuqadaas bartaan, iyo
- Hadii lahelayo macalin ku haboon.

Linda Davidsson

Rektor